REPUBLIC OF SOMALILAND

THE PRESIDENT

REF ............ DATE : ............



# Sharciga Kalluumaysiga

## Sharci Lambar 024 ee Nov.1995

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland.

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY: | Axdi Qarameedka qodobkiisa 14aad xubintiisa 1aad, 2aad, 3aad iyo qodobka 24aad |
| MARKUU TIXGELIYEY: | Baahida loo qabo sharciga Kalluumaysiga |
| MARKUU AQOONSADAY: | Soo jeedinta Wasiirka W. Kalluumaysiga |
| MARKUU HELAY: | Ogolaanshaha Golaha Wasiirada JSL. |
| MARKUU HELAY: | Ansixinta Golaha Wakiilada |

**Wuxuu Soo Saaray Sharcigan.**

Qod.1aad
<u>MASUULIYADDA.</u>

Wasaaraddu waxay masuul ka tahay horumarinta Kalluumaysiga dhowridda bii'adda nafley biyoodka iyo dhaqan-gelinta sharcigan.

Awoodda sharcigani siiyey Wasiirka, wuxuu qoral ahaan u wakiilan-karaa sarkaal kasta ama ruux shaqaale sare ka ah Wasaaradiisa.

Qod.2aad
<u>XADKA BIYAHA DALKA.</u>

Xadka biyaha dalka JSL. wuxuu u qaybsan yahay laba qaybood:-

A: Xad-biyood (ternitorial Water) oo dhan 12 mayl badeed (Nautical Miles), marka laga qiyaaso xeebta dalka.

B: Xad-biyood dhaqaale (Exculsive Economic Zone), oo sharciyan dhan 100 Mayl badeed, marka laga qiyaaso xeebta dalka, meesha ugu balaadhan iyo 30 Mayl meesha ugu yar.

C: Bada gacanka cadan waxaa xad biyood dhaqaale u yahay Dawladda Somaliland iyo Yemen oo kaliya.

Qod.3aad
**TIROKOOBKA KALLUUMAYSIGA.**

Wasaaraddu waxay uruurinaysaa tirokoobka wixiii war ah la xidhiidha kaluumaysiga, wixii hawlo kalluumaysi ah way xidhiidhinaysaa, maamulaysaa, wayna faafinaysaa wararka la xidhiidha Kalluumaysiga Somaliland.

Qod.4aad
**HORUMARINTA KALLUUMAYSIGA.**

Wasaaraddu waxay dalka ugu xil-saaran tahay, hirgelinta Hawlaha horumarineed ee Kalluumaysiga.

Qod.5aad
**WAXYAALAHA REEBAN.**

1. Waxa gaadiidka Kalluumaysiga ka reeban inay fuliyaan hawlo ama adeegsiga qalabka keenaya dhimasho, wisikhowga dhaawaca loo geysto noolaha ama dhirta badda.

2. Waxa qof kasta ka reeban inuu hayso alaab ama qalab dhaawac u keeni karta noolaha iyo dhirta badda ee goobaha kalluumaysiga.

3. Waxa kale oo qof kasta ka reeban inuu ka ganacsado ama uu kalluun ku bedesho badeecad kale ama noolaha badda ee laga qabtay biyaha Somaliland, iyada oo aan fasax laga helin Wasaaradda.

Qod.6aad
**XILLIYADDA BAD XIDHANKA.**

Wasaaraddu waxay qoraal ku soo saaraysaa, caddayn muujinaysa waqtiyada kalluumaysiga la xidhayo, iyada oo isla markaa caddaynaysa sababaha loo xidhay.

Marka loo baahdo bad-xidhanka kalluumaysiga, waa la kordhin karaa ama la yarayn karaa.

Bad xidhanku wuxuu khuseeyaa oo kaliya gaadiidka kalluumaysiga ee yaryar ee aan u adkaysanayn dabayl-xagaaga.

Qod.7aad
**RUKHSADDA KALLUUMAYSIGA.**

**Qodobka Guud.**

1. Wasaaraddu waxay rukhso-kalluumaysi siin kartaa Gaadiidka kalluumaysiga ee wadaniga iyo shisheyaba leh, waxaana laga qaadi doonaa khidmad ("Fee") khasnadda Dawladda la dhigo.

2. Qof kasta oo xiiseeya kalluumaysiga, wuxuu qaadanayaa rukhso kalluumaysi.

3. Wasaaraddu waxay codsadaha siinaysaa Rukhso Kalluumaysi oo waafaqsan sharcigan.

4. Codsiga rukhso kalluumaysi ee la soo gudbinayaa waa inuu muujiyaa:-
   A. Magaca, tafaasiisha markabka, calanka iyo dekedda uu ka diiwaan gashan yahay.
   B. Lambarka dhinaca ee markabka, xidhiidhka raadiyaha iyo mowjadda (Frequency).
   C. Magaca hantiilaha, soo kiraystaha iyo naakhuudaha.
   D. Tafaaasiisha kaluumaysiga la xidhiidha ee ku xusan arjiga codsadaha:
      I. Nooca Kalluumaysiga.
      II. Habka kalluumaysiga & qalabka uu isticmaalayo.
      III. Goobta kalluumaysiga.
      IV. Goobta wax soo saarka la dhigayo, tafaasiisha suuq-geynta, meeshq ugu dambaysa ee wax soo saarka la geynayo iyo isticmaalka amadka.
      V. Noocyada kalluunka iyo noolaha badda ee la qabanayo.
      VI. Faah-faahinta gaadiidka kalluumaysiga bad-maaxinta iyo doonyaha kale ee markabku wadan karo.
      VII. Xidhiidhada kale ee iskaashi ee uu la leeyahay Somaliland.
      VIII. Dammaanada Bangiga.
      IX. Wixii faahfaahin ah ee kale ee Wasaaraddani codsato.

5. Markabka rukhso-kalluumaysi la siiyey, waa inuu muddo 3o Casho ah Wasaaradda ku soo gaadhsiiyaa ama ku ku soo ogaysiiyaa, wixii isbedel dhaca, sida kala wareejinta lahaanshaha iyo kiraysigiisaba.

6. Lambarka rukhsadda, magaca markabka iyo dekedda uu ka diiwaan gashan yahay, waa in si cad loogu qoraa dhinacyadda Markabka.

## Qod.8aad
## QOFKASTA OO LA SIIYEY RUQSO KALUUMAYSI WAA INUU.

1. Ilaaliyaa shuruucda Dalka iyo xeer-nidaamyada (Regulations) Wasaaradda.

2. Dhiibtaa wararka la xidhiidha hawlihiisa kaluumaysi, sida(xaddiga, Noocyada, amadka (Product), goobta laga kaluumaystay, sinjiyadda-kalluunka iyo noocyada kale ee noolaha badda ee Ganacsi geli kara ama la habeeyey (Processed).

## Qod.9aad
## CILMI BAADHISTA.

1. Wasaaraddu waxay qoraal ahaan ugu ogolaanaysaa qof kasta ama markab kasta oo haysta rukhso-kalluumaysi, inuu cilmi-baashis ku sameeyo kalluumaysiga iyo hawlaha kale ee la xidhiidha khayraadka badda.

## Qod.10aad
## KANTAROOLKA & BAADHISTA & KORMEERKA.

1. Cid kasta oo ku hawland kallumaysi, waa la kurmeeri karaa lana baadhi karaa iyada oo loo eegayo baahid markaa jirta marka laga reebo hay'adaha ku shaqada leh arrintan isuduwaha Gobol ee Wasaaraddu, wuxuu kormeer iyo baadhis ku samayn karaa, Gaadiidka ku hawlan kalluumaysiga ee aagiisa.

2. Markabka ku xad gudba waxyaalaha uu koobayo sharcigani, waxa la yeynayaa dekedaha dalka ta ugu dhow.

3. Haddii markab fal-dembiyeed ku galo biyaha Somaliland, ka dibna u geynayaa gudbo xuduuda dal kale, waxa arrinta loo bandhigayaa hay'adaha ay khusayso, iyada oo la raacayo xeerka caalamiga ah ee badda.

## Qod.11aad
## G A N A A X.

1. Wixii xad gudub ah ee lagu sameeyo qodobka (7 & 9 ) ee sharcigan waxa lagu Ganaaxayaa:
   a. Doonyaha yar yar ee aan matoorka lahayn, waxa la ganaaxayaa ($ 100-150 $);
      I. Doonyaha yar yar ee matoorkoodu u dhexeeyo 6-30 faras waxa la ganaaxayaa ($400 - 800$) Maraykan.
      II. Doonyaha yar yar ee matoorkoodu u dhexeeyo 31-100 faras waxa la ganaaxayaa (1.000$ 2.000$)Maraykan.
      III. Doonyaha yar yar ee matoorkoodu u dhexeeyo 61-100 faras waxa la ganaaxayaa ($3.000-5.000$)Maraykan.
   c. Maraakiibta matoorkoodu u dhexeeyaan 101 - 300 faras, waxa la ganaaxayaa ($10.000 - 50.000$) D.Maraykan.
   d. Maraakiibta matoorkoodu u dhexeeyaan 300- iyo wixii ka sareeya, waxa la ganaaxayaa ($50.000 - 100.000$)Dolar Maraykan.

Haddii fal dembiyaadku culus yahay ama mar labaad dembiiluhu galo isla fal dambiyeed lagu soo caddeeyey, arrinta waxaa loo gudbinayaa Maxkamadda (CRIMINAL COURT).

2. Qofkii isticmaala arrimaha hoo ku xusan waxa la ganaaxaya Xadhig dhan 3 Sanno ilaa 5 Sanno ama lacag dhan ($5.000 - 50.000$) Doolar Maraykana ama waa la isugu dari.
   a. Isticmaalka qarxiyeyaal ama Sun.
   b. Meelaha Kalluumaysiga ka reebban oo lagu kalluumaysto.
   c. Kalluumaysi noocyada kalluunka ama noolaha bada ee kale reebban.
   d. Adeegsiga qalab ama alaab la reebay adeegsigeeda.
3. Gaadiidka kale ee lagu qabto isagoo si sharci darro ah u kalluumaysanaya:

WAXA LA GANAAXAYAA:-

a. USD ($400 - 800$) Haddii uu matoorkoodu u dhexeeyo 6- 30Faras
b. " ($1.000 - 2.000$) Hadii uu matoorkoodu u dh/yo 31-60 "
c. " ($3.000 - 5.000$) Haddii uu M/koodu u dh/yo 61-100"
d. " ($0.000 - 50.000$) Haddii uu M/koodu u dh/yo 101-300"
e. " ($50.000-100.000$) Haddii uu M/koodu u dh/yo 300 fasax iyo wixii ka sareeya.

4. Ciddii diida inay soo gudbiso warbixinnada (Reports), ama fullin weyda qodobada sharcigan, waxa la ganaaxayaa ($3000-500$) Doolar Maraykana.

5. Ciddii ka soo bixi weyda xilka saaran ama fulin-weyda heshiis laba dhinac wada galeen, waxa dib loola noqonayaa la baabi'inayaa rukhsadda kalluumaysi ee la siiyey.

6. Cid kasta oo usgageysa(wasakhaysa) biyaha Somaliland iyo goobaha kalluumaysiga, waxa la ganaaxayaa ($500-50.000$) oo Doolar Maraykan(USD).

Qod.12aad
DHAQAN -GELINTA.

Ciddanka Badda ee Jamhuuriyadda Somaliland ayaa yeelanaya awooda iyo masuuliyadda dhaqan gelinta sharcigan.

Qod.13aad
LA WAREEGID HANTI.

1. Cid kasta oo sharcigan ku xad gudubta, waxa lagala wareegayaa, qalabka ama gaadiidka ama shay kale oo uu adeegsanayey markii fal danbiyeedka lagu qabtay.

2. Waxa lala wareegi karaa kalluunka ama noolaha badda ee kale u markabka dushiisa saartay.

3. Fal-dambiyeedyada laga galo sharcigan, waxay hoos imanayaan awooda Maxkamadda Dalka.

Qod.14aad
XEER-NIDAAMIYE (REGLATION).

1. Marka uu Madaxweynuhu dhegeysto talad Wasiirka kalluumaysiga iyo H/Xeebaha, waxa uu soo saari kara xeer nidaamiyayaal (Regulation) ku salaysan habka ugu haboon ee loo fulinaayo sharcigan.

Qod.15aad

TIR-TIRRIDDA & DHAQAN GALKA.

1. Arrinmaha (provisions) aan waafaqsanayn sharcigan waa la tirtiray.

2. Sharcigani, wuxuu dhaqan gelayaa 15 cisho ka dib marka uu Madaxweynuhu saxeexo ama lagu soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Somaliland.

Maxamed Ibraahim Cigaal
Madaxweyne

REPUBLIC OF SOMALILAND
President